



{waan idin waydiindoona maalinta qiyaamaha nicmooyinka Ilaahay idinku galadaystay}

Zubayr Binu Cawaam Allaah ka raali ahaadee wuxuu yiri: Markay soo dagtay: {waan idin waydiindoona maalinta qiyaamaha nicmooyinka Ilaahay idinku galadaystay} [suurada takaasur:8], wuxuu yiri Zubayr: Rasuulka Ilaahayow, nicmooyinkee nala waydiinaya, ma labada madmadaw ee timirta iyo biyaha? wuxuu yiri: sidaas ayey noqon".

[Xadiis Xasan ah] [waxaa wariyey tirmidi iyo ibn maajah]

markay soo degtay aayada: {Waa la idin waydiin maalinta qiyaamaha nicmooyinkan}, waa la idin waydiin inaad la timaadeen mahadnaqa nicmooyinka Ilaahay idinku galadaystay, Zubayr Binu AlCawaam ayaa yiri -Allaha ka raali ahaade: Rasuulka Ilaahayow scw, nicmooyinkee ayaa nalawaydiin doonaa?! waxaanba haysanaa waa laba nicmoo su'aalba mudnayn in wax nalaga waydiiyee kuwaasoo ah timirta iyo biyaha! Nabigu scw wuxuu yiri: adinka waa la idin waydiin doonaa nicmooyinka xataa xaaladan aad ku sugan tiihin iminka, waayo labadani waa labo nicmo oo waawayn oo nicmooyinka Ilaahay ka mid ah.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65075>